

Ombudsman ka Biyaha iyo Korontada ayaa ku caawin kara



Ombudsman ka Biyaha iyo Korontada Galbeedka Australiya wuxuu helaa oo xaliyaa cabashooyinka khuseeya bixinta adeegyada korontada, gaaska iyo biyaha ee adeeg bixiyayaasha. Waxaana hogaaminaya mabaadiida madaxbanaanida leh, cadaalada dabiiciga ah, helitaanka, sinnaanta, wax ku oolnimada iyo ka warqabka bulshada. Adeegyadeenu waa bilaash.

Yaa noo soo caban kara?

Macaamiisha adeegyada korontada gaaska ama biyaha iyo dadka kale ee uu saameeyey adeega biyaha. Waxaad idmi kartaa qof kale inuu ku meto adiga.

Yaad nooga cabban kartaa anaga?

Waxaad ka caban kartaa adeeg bixiyayaasha biyaha, gaaska iyo korontada ee ku qoran websayskeena ah www.ombudsman.wa.gov.au/energyandwater ama waxaad nagala soo xiriiri kartaa wixii macluumaad ah.

Goormaad noo soo caban kartaa?

Ka hor intaadan nala soo xiriirin, waa inaad iskudeydo la xalinta cabashadaada adeeg bixiyayaasha biyaha, gaaska ama korontada. Haddii aan cabashadaada la xalin, ama haddii ay jirto dib u dhac aan macquul ahayn, waxaad noola soo xiriiri kartaa wixii caawimaad ama tallo ah.

Maxaan baari karnaa?

Waxaan baari karnaa cabashooyinka khuseeya bixinta adeegyada korontada, gaaska iyo biyaha ee adeeg bixiyayaasha. Noocyada korontada, gaaska iyo arimaha biyaha ee Ombudsman ku tixgelin karo waa:

- Bixinta ama bixinta korontada, gaaska ama biyaha;
- Qaansheegatada;
- Maamulka adeegyada deynta iyo lacag bixinta;
- Deymanka laysku dacweynayo ama lagu muransan yahay iyo dib u helida deynta;
- Jarida iyo xaddidida bixinta iyo hore u bixinta lacag dib laguugu soo celin karo;
- Adeega heerka lacag bixinta;
- Adeegyada suuqgeynta;
- Isticmaalida awooda la xiriirta dhulka, dhulka kugu xiga ama guriga;
- Waxyeelada ama khasaaraha ee khuseeya arimaha bixinta; iyo
- Cabashooyinka qof aan ka ahayn macaamiil ay saameysay adeega biyaha.

Ombudsman ka Tamarta iyo Biyaha wuxuu diidi karaa inuu baaro haddii cabashada aysan lahayn dan ku filan arinta, baaritaanka ma aha lagama maarmaan ama waxaa jira hay'ada aad uga haboon oo cabashada wax ka qabanaysa.

Maxaa aanan baari karin?

Ma baari karno:

- Dejinta qiimayaasha ama kharashaadka ama go'aaminta qaababka qiimaha;
- Waxqabadka dhaqameed ee ka baxsan heerka korontada, gaaska ama laysanka adeegyada biyaha;
- Tusmada qorshayaasha Dawlada;
- Cabashooyinka hada laga fekerayo, ama horey looga fekeray, maxkamad ama tribunal; ama uu ombudsman ku u arko inay maxkamadi ama tribunal xukunto;
- Wixii arin ah ee si gaar ah sharcigu ugu baahan yahay , codes, laysan iyo amarada ay maamuleyso hay'ad kale iyo
- Arimaha la xiriira dhalooyinka gaaska.

Xalinta cabasho, Ombudsman ku waa inuu tixgeliyaa:

- Dhacdooyinka ka baxsan kontoroolka korontada, gaas ka ama bixiyaha adeega biyaha iyo
- Falalka ay qaadayaan adeeg bixiyayaasha korontada, gaaska ama biyaaha (iyo wixii ka dhasha ee cawaaqib ah) ee waafaqsan tilmaanta ama ogeysiiska uu helay adeeg bixiyuhu.

markaad soo xareyso cabasho, waxaan qiimeynaynaa si aan u go'aamino sida ugu wanaagsan ee aan ku maamuli lahayn. Sida aan u maamulno cabashadaada waxay ku xiran tahay talaabooyinka haddaba la qaaday si loo xaliyo, sida ka muuqata shaxdan ku xigta.

Waxaan ku weydiin doonaa inaad iskudeydo inaad arinta la xaliso adeeg bixiyaha korontada, gaaska ama biyaha marka koowaad. Haddii cabashadaada aan la xalin, Ombudsman ka Biyaha iyo Korontada ayaa baari doona iyo meeshii ku haboon, iskudey inaad xaliso cabashada.

Waxaan heysanayaa awood aan ku gaarno go'aamo dhaqangeli kara oo qiimohoodu gaarsiisan yahay ilaa \$20,000 ama ilaa \$50,000 oo uu la socdo heshiiska bixiyaha.

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Waxaad na weydiin kartaa macluumaad, soo xareyn kartaa cabasho ama aad noogu soo diri kartaa natiijo celin adoo isticmaalaya taleefan, warqad, iimeyl, fakis ama websaytkayaga adoo isticmaalaya Foomka Interneetka. Foomamka sidoo kale waxaa laga daabici karaa websayskayaga. Faahfaahinta xiriirkeena waxay ka muuqdaan hoos.

Xafiiska Ombudsman ka Biyaha iyo Korontada waa furan yahay laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeyso 9.00 subaxnimo iyo 4.30 galabnimo.

Qofka cabanayaa wuxuu taleefan u soo diraa, warqad buu u soo qoraa ama wuxuu soo booqdaa Ombudsman ka Biyaha iyo Korontada

